IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho 25 Luulyo 1978 L. 2 R 7

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 28 ee 16 Juunyo 1978 Dhismaha Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed. Bogga 483

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 62 ee 25 Maajo 1978 Nidaamka khidmadda hawlaha ay qabato Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed. » 505

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 63 ee 25 Maajo 78, Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda. » 488

### QAYBTA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

XEER Madaxweynaha J.D.S. lam. yahay 63 ee 25/5/1978, Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. yihiin 17 18 19 ee 1da Luulyo 1976 kuna saabsan habka lagu dhisay Dawladda.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo nidaamka u degsan Kulliyadda Injineeriyadda.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la soo dejiyo Xeer nidaamiya xiriirka iyo Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda taasoo loogu dan leeyahay in wax wada qabsiga ka dhexeeya lagu fuliyo ujeeddooyinka waaweyn oo ay leeyihiin labada Ha'adood.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada ay soo jeediyeen wasiirka Hawlaha guud iyo kan Tacliinta Sare.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**XEERKA SOO SOCDA:**

**Qodobka 1aad**

Xeekaan wuxuu nidaaminayaa xiriirka iyo Iskaashiga xagga farsamada ee dhexmaray Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda.

**Qodobka 2aad**

Ujeeddooyinka waaweyn oo nidaaminaaya xiriirka Iskaashiga ka dhexeeya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyada ee Qodobka 1aad lagu soo tilmaamay waa sida soo socota :

b) Soomaaliyeenta aqoonta farsamada Injineeriyada si loo gaaro isku-filnaasho.

t ) Ku dhiiri gelinta farsamayaqaannada Soomaaliyeed hawlaha Injineeriyada, daraasadda hindisaha mashaariicda laga sameynaaya Dalka si loogga kaaftoomo khubaraada shisheeyaha.

j ) Xoojinta tababarka xagga farsamada ee ardayda kulliyada Injineeriyada si loo diyaariyo farsamayaqaanno Soomaaliyeed oo aqoon fiican u leh mashaakilka farsamada ee u gaar ah Dalka.

x) Kor u qaadidda heerka aqoonta farsamayaqaannada Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed si ay ku sii takhasusaan laamaha kala duwan ee Injineeriyadda, lagana faa'iideysto aqoonta ay u leeyihiin mashaakilka farsamada ee u gaar ah Dalka.

kh) Daraasadda iyo baarista farsamada Injineeryadda ee la xiriira mashaariicda laga hirgelinaayo Dalka.

d) Horumarinta cilmi baarista iyo Farsamada Injineeryadda ee Dalka. Ujeeddooyinkaas waxaa gundhig u ah ujeeddada loo dhisay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda.

**Qodobka 3aad**

Xiriirka iyo Iskaashiga xagga Farsamada ee dhexmaraya Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo Kulliyadda Injineeriyadda wuxuu ka koobnaanayaa qaybahaan:

b) Wakaaladda Hindisaha waxay ka kaalmaynaysaa Kuliyadda Injineeriyadda tababarka xirfadeed ee Ardayda canta ku hayso.

t ) Daraasadda, Hindisaha, Kormeerka mashaariicda dhismaha.

j. Wakaaladda Hindisaha, waxay u bandhigaysaa ardayda Kulliyadda Injineeriyadda daraasado ku saabsan mashaakil farsamo ee la xiriira hawlaha Wakaaladda Hindisaha oo u baahan baaris iyo tijaabo gaar.

x) Injineerrada Soomaaliyeed ee ka shaqeeya Wakaaladda Hindisaha waxay ka mid noqonayaan barayaasha Kulliyadda Injiyeeriyadda xagga maadooyinka farsamada (Materie applicative), iyadoo la dhowraayo xeerka u degsan Jaamacadda.

kh) Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injineerada waxay wada jir u sameynayaan Cilmi baaris lagu darso laguna xalliyo mashaakilka farsamada qaarkood sida tijaabada dhismooyin tusaala ah (Studio e prove su modelli.)

d) Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injineerada iyo Jeolojiyada waxay iska kaashanayaan horumarinta Cilmi Baaris iyo tijaabada la xiriirta Injineeriyadda sida Baarista iyo tijaabada alaabta dhismaha (Ricerche e prove sui materiali da costruzione).

**Qodobka 4aad**

Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injiyeeradda iyo tan Jeolojiyada waxay si wada jir ah u soo saarayaan natiijooyinka hadba laga gaaro darajada cilmi baarista iyo tijaabada ay wada jir u sameeyaan.

**Qodobka 5aad**

Fulinta Barnaamijka xiriirka iyo iskaashiga ku tifaftiran Qodobka 3aad waxaa wadajir si toos uga mas'uul ah Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyada Injiyeerada.

**Qodobka 6aad**

Wakaaladda Hindisaha iyo Kulliyadda Injineerada waxay isku kaashanayaan qalabka iyo kharashka lagu fulinaayo hawlaha ku xusan Qod, 3aad iyagoo wada isticmaalaya shaybaarada iyo qalabka tijaabada ay gaar u leeyihiin.

**Qodobka 7aad**

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan gelayaa taariikhda uu ku soo baxo.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Madaxwaynaha Jamhuuriyada Dim. Soomaaliya

Muqdisho: 25/5/1978

(J/le Axmed Ashkir Bootaan)

WASIRKA HIDAHA IYO T. SARE

(J/le Maxamed Xawaadle madar

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD.